



Barnaamijka Jaalalka Waxbarashadda

Bayaanka Hawsha: “Waxaa ugu weyn ee uu qofku sameyn karo waa inuu kaalin buuxda ka qaataa waxbarashadda ilmihisa . . . marka aad ilmaa ku dadaashid ee uu guul gaadho, waxay arrintaasi markhaati cad u noqoneysaa dadaalkii ay muujiyeen dadkii ilmaha xanaaneyneyey.”

Barnaamijka Jaalalka waxbarasho ee San Diego City Schools (SDCS) oo bilaabmay sannadkii 1982, wuxuu ahaa mid ay heshiis wadajir ah ku sameeyeen dugsiyada iyo ganacsatada, farshaxanka dhaqanka, xirfadleyaasha, adeegyada iyo ururada samafalka ah; machadyada waxbarashadda sare; ha’ayadaha dawlada; iyo xarumaha mileteriga. Heshiiskaasu wuxuu isugu jirey inay awoodooda isugu geeyaan si ay arrimo gaar ah u fuliyaan. Jaalalkaasu mid kasta kan kale wuu ka duwan yahay, qorhse kastana dugsiyada iyo jaalka gaarka ah ayaa go’aan ka gaadheya waxa ay sameynayaan. Jaalnimadu waxay ku xidhan tahay kheyraadka dadka laga heli karo--ee maaha deeq lacageed oo la bixiyo. SDCS Nidaamka Maamulka ee 9610 ayaa sharaxaya Barnaamijyada Jaalalka Waxbarashadda ee degmada.

Barnaamijku wuxuu ganacsatada iyo ururada jaaliyadaha fursad u siineyaa inay:

- qeyb firfircoon ka qaataan waxbarashadda ardeyda;
- waxbarashadda guud ee maanta la dhigeyno ay aqoon uga helaan; iyo
- mustaqbal dhaqaale oo fiican oo ay u xaqiijaan ardeydeena , jaaliyada San Diego, iyo qarankaba.

Liiska waxyaabaha ay dugsiyada iyo jaalalku ku talo bixiyeen ee ah hawlaha ay qabanayaan jaalalku waa la heli karaa. Hawlahaasu waa qalabka dugsiyada iyo jaalalka ka caawineya inay jaalalku ahmiyada saaraan wax akhriska iyo wax qorista, xisaabta, barashadda jidh dhiska, saayniska, cilmiga bulshada iyo farshaxanka bandhiga iyo muuqaalka. *Warbixin Sannadeedka ee Jaalalka Waxbarashadda* ee baakidhka shaqaaleysiinta, warbixinta fiidiyaha iyo qalablaka carruutaba waxaa laga heli karaa Waaxda Xidhiidhka Jaaliyada.

Waa maxay hawlaha ay jaalalku caawimaad ka geysanayaan?

- Waa inay ardeyda baraan xirfadaha akhriska, qoraalka, saayniska iyo xisaabta
- Waa inay ardeyda la taliyaan, una sheegaan waxyaabaha ay ku fiican yihiin
- Waa inay caawiyaan dadaalka loogu jiro hawlaha dugsiyada iyo shaqada, waxaana ka mid ah iyadoo goobaha shaqada la booqdo, ardeyda goobaha shaqada muddo gaaban loo diro, bandhigyada shaqooyinka oo laga qeybgalo iyo iyadoo la martiqaado qof arrimaha shaqada ka hadla ama khudbad ka jeediya
- Waa inay dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya laga qeyb geliyaa guddiga qiimeynaya bandhiga ay ardeyda sannadkaas dugsiyada ugu dambeeya sameynayaan ama eegaan hawlaha ay ardeydu qabteen
- Waa inay dugsiyada ka caawiyaan qorsheyaasha qalabka casriga ah
- Waa inay dugsiyada ka caawiyaan hawlaha suuqgeynta, sida soo saarista wargeysyo, buugaag yaryar iyo sii deynta war murtiyeedka
- Waa inay jaalalka iyo guddiyada la-talinta u sahlaan inay kheyraadka jaaliyada fasalada u gudbiyaan.
- Waa inay fursadaha shaqooyinka u gudbiyaan shaqaalaha iyo ardeydaba
- Waa inay ka qeybgalaan mashaariicda dhismaha dugsiyada lagu qurxiineyo
- Waa inay ardeyda baraan waxyaabaha ku saabsan heerarka akhriska, qoraalka, xisaabta, saayniska iyo xirfadaha koombiyuutarka ee ay shirkaduhu rabaan.

Somali Version ,PARENTHSHIP REVISED FACT SHEET

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay Annie E. Casey Foundation

La xidhiidh: Community Relations Department: (619) 725-5592 Su’aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578 www.sandi.net/partners

San Diego City Schools(SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 140,000 oo ardey, waxayna leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo 17,000 oo shaqaale ah. DMS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageerto dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda..

“Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah.”

OO KOOBAN

- ❖ Jaalalka ka qeybgalay qiyaas ahaantii waa 1,400 oo ka kooban ganacsatada iyo ururada jaaliyada
- ❖ Jaalalka marka boqolkiiba la eego ugu weyni waxay leeyihiin 30 ama in ka yar oo shaqaale ah
- ❖ Sannadkii 2002-2003 waxay jaalalka waxbarashadu ku deeqaan qiyaastii lacag gaadheysa \$4.4 malyan , taas u isugu jirtey xooga dadka, dhaqaale iyo alaabta adeegyada
- ❖ Jaalalku waxay sare u qaadeen niyad wanaaga shirkadaha iyo wax soo saarka shaqaalaha